# TILMAAMAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA XOOLAHA EE AASAASIGA AH

**(MINIMUM GUIDELINES FOR THE IMPLEMENTATION OF CAH PROJECTS IN THE EAST-HORN ECO-SYSTEM)**

**PREPARED BY VETAID AND CAPEUNIT/AU IBAR**

**May 2004**

# Table of Contents

**TILMAAMAHA DARYEELKA CAAFIMAADKA XOOLAHA EE AASAASIGA AH** ..... 1
QAYBTA KOWAAD ..... 3
1. HORDAC ..... 3
1.1. Ujeedooyinka Tilmaamaha ..... 3
QAYBTA LABAAD ..... 5
2.1. Shuruudaha Iyo Duruufaha Fulinta/Fulitaanka D.C.A.X. ..... 5
2.2. Qaabka/ Habka Loo Fulinayo- (Tallaabooyinka). ..... 6
2.2.1. Sahan Deegameed ..... 6
2.2.2. Waraysiga Ama La Waranka Dadweynaha ..... 7
2.2.3. Xulashada Daryeelaha ..... 7
2.2.3.1. Daryeele waa kuma ..... 7
2.2.3.2. Yaa Ku Haboon Daryeelenimo ..... 7
2.2.3.3. Waajibaadka Daryeelaha ..... 8
2.2.3.4. Xuquuqda Daryeelaha ..... 8
2.2.4. Qaabka Tababarka Daryeelaha ..... 9
2.2.4.1. Wakhtiga Tababarka ..... 9
2.2.4.2. Goobta Tababarka ..... 9
2.2.4.3. Tirada Dadka la Tababarayo ..... 9
2.2.4.4. Tababaraha ..... 9
2.2.4.5. Qaabka Tababarka Loo Fulinayo ..... 10
2.2.4.6. Muddada Tababarka ..... 10
2.2.4.7. Qaybaha Duruusta Tababarka Iyo Waqtiga Loo Qoondeeyey ..... 11
Qaybta koowaad ..... 11
Qaybta labaad ..... 11
Qaybta saddexaad ..... 11
2.3. Xiriirka Daryeelaha iyo Takhtarka/Kaaliyaha Deegaanka ..... 12
2.3.1. Takhtarka/kaaliyaha waxaa laga rabaa: ..... 12

2.3.2. Takhtarku/kaaliyuhu wuxuu Daryeelaha ka sugayaa: ..... 12

# QAYBTA KOWAAD

## 1. HORDAC

### 1.1. Ujeedooyinka Tilmaamaha

Ummadda ku hadasha afka Soomaaliga iyo lah-jadaha la xiriira tiradeedu waxay ka badantahay ilaa X malyuun oo qof waxayna ku baahsantahay dhulka balaadhan ee Geeska Afrika ee isaga gudba dalka Soomaaliya (iyo maamul gobollada), Waqooyiga bari ee Kiiniya, Kilinka shanaad ee Ethiopia iyo Jamhuuriyadda Jabuuti. Dhulka Soomalidu degto wuxuu u badanyahay dhul kulul oo roobku ku yaryahay, sidaas darteed ayaa habka nolosha inta badan ee dadka Soomaaliyeed wuxuu si toos ah ugu xiran yahay dhaqasha xoolaha nool sida geela, lo'da, ariga iyo gamaanka.

Xoolaha nool ee Soomaalidu dhaqato tiro sugan lagama hayo waxaase la hubaa inay 50 malyuun oo neef ka badantahay kuwaas oo leh noocyo badan. Mataal ahaan geela ku nool Qaaraddan Afrika ilaa boqolkii toddobaatan (70%) waxay ku jirtaa gacan dad Soomaaliyeed.
Ahmiyadda xooluhu u leeyihiin ummadda Soomaliyeed waa mid aan la soo koobi karin, waxaana xoolaha loo dhaqdaa oo lagu haystaa manaafacaadsiyo badan oo ay ka mid yihiin; caano, subag, hilib, maqaar iyo saan, rarasho iyo alaab qaadis, bero falid iyo lacag cadaan ah markii la gado. Sidoo kale xooluhu waxay leeyihiin ahmiyad weyn oo dhanka dhaqanka ah waxaana loo isticmaala arrimaha ay ka mid yihiin guurka iyo bixinta magta.

Deegaan-Goboleedka Soomalidu degto (Somali eco-system) wuxuu ku caan baxay ganacsiga xoolaha nool, waana adduunka meesha ugu badan xoolo nool oo la dhoofiyo. Maadama xoolaha nooli ahmiyadaas dhaqaale leeyihiin waxaa lagama maarmaan ah in la daryeelo caafimaadkooda si loo badiyo tirada korna loogu qado tayada wax soo saarkooda.

Daryeelka caafimaadka xoolaha ee Deegaan-Goboleedku wuxuu soo maray marxalado kala gedisan kontonkii (50)sano ee u dambeysey.
Waqtigii dawladaha isticmaarku ka ka talinayeen Gobolka intiisa badan (laga reebo Ethiopia), waxaa daryeelka caafimaadka xoolaha fulinjirey waaxyo ama hay'ado ay u abuureen fulinta hawshaas.
Isticmaarkii Talyaanigu wuxuu xaruntii baadhista caafimaadka xoolaha ee u horeysey ka furay magaalada Marka sannadkii 1914kii, gobolladii waqooyina dhakhaatiir Ingriis ahi waxay yimaadeen sannadkii 1924 tii markaas oo ay bilaabeen in ay dad Soomaaliyeed u tababaraan hawsha caafimaadka xoolaha.

Dawladihii wadaniga ahaa ee yimid xoriyaddii ka dib waxay ku dadaaleen in ay daryeelka caafimaadka xoolaha gaarsiiyaan meelkasta iyada oo kharash la'aan ah. Taas

oo socotey muddo yar waxay joogsatay markii dhaqaale xumo curyaamisey adeegyadii muhiimka ahaa sida kan caafimaadka xoolaha.
Waxaa bilaabmay in la tababaro oo daawo loo dhiibo qaar ka mid ah xoolo-dhaqatada si ay uga fuliyaan daryeelka caafimaadka xoolaha meelaha aanay joogin shaqaalihii dawladda ee hawshaas u xilsaarnaa kuwaas oo ku soo aruuray magaalooyinka waaweyn. Gobollada Dhexe ee Soomaaliya ayaa ahaa meeshii ugu horeysey ee hawsha Daryeelka Caafimaadka Xoolaha ee Aasaasiga ah ee Dadweynaha (DCXA) laga fuliyo dalka Soomaliya, halkaas oo ay ka howlgali jirtey hay'addii GTZ ee Jarmalka.

Gobolka Waqooyi Bari ee Kiinya sidoo kale dhalinyaro u dhalatay ayaa billabay in ay hirgeliyaan mashaariic daryeelka caafimaadka dadka iyo xoolahaba sannadkii 1989. Markii ay dawladdii Soomaaliyeed bur-burtay hay'adihii gurmadka ahaa gar-gaarkii deg-dega ahaa waxay ku so dareen qayb caafimaadka xoolaha ah sida daawooyin iyo taakulayn la siinayo takhatiirtii iyo kaaliyayaashii dhulka joogey.
Muddo yar ka dib ayay hay'adahaasi ogaadeen in habka ay mucaawanada u wadaan aysan ahayn mid yeelaanaysa raandhiis ama dhaxal, waxaan la bilaabay in la hirgeliyo mashaariic ku salaysan DCXA ee dadweynaha.
Mashaariicda DCXA waxay soo mareen marxalado kala duwaan oo midiba tii hore ka heer sarayso, kuwaas oo kala aha; casriga **Tababar oo Siidaa** (train and release), habkii **Kharash soo Celinta** (cost recovery) iyo kan **Hantigelinta Gaarka ah** (full privatization).

Waxaa hadda marag ma doonto ah in mashaariicda ku salaysan daryeelka caafimaadka xoolaha ee dadweynuhu fulinayo ay qayb ama door muhiim ah ka qaadan karaan caafimaadka xoolaha haddii si haboon loo qorsheeyo.
Sababaha ka dhigay DCXA lagama maarmaan waxaa ka mid ah:

- Baaxadda weyn ee dhulka xoolo-dhaqatadu degto
- Habka reer-guuraanimada ee xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed
- Joogis la'anta taakhaatiir iyo kaaliyayaal caafimaad xoolaad ee tuulooyinka iyo miyiga xooluhu joogaan
- Jidad ama wadooyin xumada meelaha qaar
- Naba gelyo la'anta ka jirta meelo badan

Dhammaan hay'adihii faraha badanaa ee fuliyey mashaariicda DCXA iyo kuwa hadda weli ku hawlaniba mid kasta oo ka mid ahi waxay samaysatay manhaj iyada uu gaar ah, waxayna tababarka u fulisey sidii ay iyaga markaas ula ekaatay. Manaahijtaas badan midkasta wuxuu leeyahay meelo uu ku fiicanyahay iyo dhaliilo labadaba, sidoo kale ma jiro manhaj la isku raacay oo hadda la isticmaalo.

Buugan Tilmaamaha Daryeelaha Caafimaadka Xoolaha ee Aasaasiga ah waa kii u horeyey oo Afka Soomaaliga ku qoran oo tifaftiran waxaana loogu tala galay in laga isticmaalo dhamaan Deegaan-Goboleedka Soomaaliyeed qeybihiisa kala duwan.

Waxaa la filayaa in buugani waxtar u yeelan doono fulinta hawlaha DCXA ayna ka fa'aiidaysan doonaan Daryeelayaasha, tababarayaasha, hawl wadeennada caafimaadka xoolaha, iyo guud ahaan xoolo-dhaqatada Deegaanka.

# QAYBTA LABAAD

## 2.1. Shuruudaha Iyo Duruufaha Fulinta/Fulitaanka D.C.A.X.

Sida la wada ogsoonyahay xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed inteeda badani waxay ku nooshahay nolol reer guuraa nimo oo xoolaha hadba loo rarayo meeshii baad iyo biyo leh. Dhulka xoolahaasi ku sugan yihiin inta badan ee sannadkii waa dhul ka durugsan magaalooyinka iyo tuulooyinka la deganyahay. Sidaas darted xoolahaasi ma heli karaan daryeel caafimaad oo ay bixiyaan xirfadlayaasha sare ee cilmiga xoolaha. Xoolo-dhaqatadii waxay dantu ku kalliftay in ay sameeyaan wixii ay ka maarmi waayeen taas oo ah, in ay u doontaan oo ka soo iibsadaan daawo meelkasta oo ay tegi karaan, ka dibna xoolahahooda ay jecelyihiin daawooyinkaas u siiyaan hadba sidii ay iyaga ula noqoto.

Isticmaalkii daawo aan aqoon gaar ah loo lahayn waxay u keentay xoolo-dhaqatadii khasaare badan. Khasaarahaasi wuxuu ka koobanyahay:

- Lacagtii dawada lagu soo gaday oo luntay
- Neefkii bukey oo aan bogsoon ama raisan ee ama dhinta ama caaqiibo beela muddo dheer
- Neefkii jiranaa oo ay soo gaaraan dhibaatooyin kale oo la xiriira daaweyn xumada sida barar iyo maal ku samaysanta meeshii laga mudey ama laga duray
- Keenayaasha cudurada qaarkood sida Baakteeriyada iyo keenaha Gosha oo daawooyinkii loogu talagalay u samaysta ama u yeeshay adkaysi daawooyinkii loogu talagalay hadhowna la daaweyn kari waayo.

Markii in badan lagu dadaaley sidii reer guuraaga raacatada ah loo gaarsiin lahaa daryeel caafimaad xoolaad, waxaa iyada oo lala tashanayo xoolo-dhaqatadaas laftooda laga maarmi waayey in qaar ka mid ah iyaga la siiyo aqoon iyo xirfad ku saabsan caafimaaadka xoolaha oo u suurta geliya inay daaweystaan cudurada sahlan ee xoolaha ay dhaqdaan.

Fulinta mashruuc Daryeelka Caafimaadka Xoolaha ee Aasaasiga ah oo dadweynuhu wado oo guuleystaa waxay leedahay shuruudo, kuwaas oo haddii aan la tixgelinin keeni kara in mashruucu noqdo mid lagu khasaaro raad waxtar lehna aan ka tegin. Shuruudahaas waxaa ka mid ah:

- DCXA waxaa laga hirgelinayaa meel aanay joogin ama gaadhi karin dhakhtarada iyo kaaliyayaasha caafimaadka xoolaha oo ku hawlan daryeelka caafimaadka xoolaha
- Baahi looga qabo goobtaas DCXA.

Meelo badan ayaa laga hirgeliyey mashaariic DCXA oo aan si fiican loo qorshayn, kuwaas oo aan ka dambeyn markii ay tageen hay'adihii maal gelinayey. Taasi waxay ku timid iyada oo la tababaray dad aan loo habayn sidii ay hawsha u sii wadilahaayeen.

Hay'adda fulinaysa mashruuca waxaa laga rabaa in ay hubiso in ay taaganyihiin dhamaan tiirarkii uu isku taagi lahaa mashruuca una suurta gelin lahaa in uu isa sii wadi karo, siina socon karo tageero dibadeed la'anteed.
Arrimaha lagama maarmaanka u ah guusha iyo sii socodka ama isasii wadista waxaa ka mid ah:

- ❑ Taageerada buuxda ee qaybaha bulshada beeshaas
- ❑ Xoolo-dhaqatadu in ay diyaar u yihiin isticmaalka hawsha ay hayaan Daryeelayaashu iyaga oo ogol bixinta qadar lacag ah oo dul saar ah, taas oo muhiim u ah dhiiri gelinta iyo nolosha Daryeelaha iyo qoyskiisa
- ❑ In ay jiraan aqoonyahannada cilmiga xoolaha oo diyaar u ah inay taageeraan mashruuca iyaga oo qaadanaya masuuliyadda qaybtooda sida; tababarista, daawo siinta iyo kormeerka Dareyeelayaasha.
- ❑ Inuu jiro hab socodka daawada oo aan kala go' lahayn, cidkastana faa'iido ugu jirto
- ❑ In uu jiro hab la raaco oo ah sidii mashruucu isu sii wadilahaa faragelin dibadeed laanteed.

### 2.2. Qaabka/ Habka Loo Fulinayo- (Tallaabooyinka).

Markii la rabo in mashruuc DCXA la hirgeliyo waxaa jira tallabooyin loo bahanyahay in loo fuliyo sida ay u kala horeeyaan, waxaan ka mid ah:

- ➢ Sahan deegaameed aasaasi ah
- ➢ Dad la kulan, la sheekaysiga dadka, la warran dadweynaha
- ➢ Xulashada ama doorista Daryeelayaasha
- ➢ Tababarka iyo qalabaynta Daryeelaha
- ➢ Kormeerka, iyo daawosiinta Daryeelaha
- ➢ Ku xidhnaansha rug daawo oo gaar ah (linkage to private drug supply)
- ➢ Hab ka bixitan oo qeexan (clear exit strategy).

#### 2.2.1. Sahan Deegameed

Sahanka ujeedadiisu waa:

- In cidda hawsha fulineysaa ay barato meesha mashruuca laga fulin doono, dadka iyo deegaankaba
- In la ogaado hab-dhaqameedka beesha; caadooyinka, maamulka, iyo qab-nololeedka guud
- In la soo ururiyo wixii macluumaad ah ee la xiriira daryeelka caafimaadka iyo xannaanada xoolaha

Sahanka waxaa lagu isticmaalayaa qaabka dad waraysiga ama macluumaad ururinta ee loo yaqaan PRA oo ah hab dadka fekerkooda iyo baahidooda lagu ogaado waxaana la waraysanayaa oo ka qayb qaadanaya dhamaan xubnaha bulshadaas oo ay ku jiraan dumarka iyo caruurtu. Macluumadka ku saabsan caafimaadka xoolaha ee la ururinayo waxaa ka mid ah: tirada xoolaha, noocyada xoolaha, cudurada ugu badan ee xoolaha naafeeya, heerka geerida/dhimashada, daawooyinka laga isticmaalo deegaankaas, xiliyada cuduradu u badanyihiin IWM. Macluumaadkani waxay ifinayaan xaaladda

caafimaadka xoolaha ee guud waxayna wax weyn ka tarayaan habka tababarka Daryeeluhu u socon doono.

**Doorka haweenka**

Marxaladdan waraysiga marka la marayo waxaa muhiim ah in aan la ilaawin doorka haweenku ka qaato daryeelka caafimaadka xoolaha maadaama ay iyaga yihiin kuwa gacanta ku haya oo xanaaneeya xoolaha intooda badan sida; ariga, waylaha, awrta iyo irmaanka.

### 2.2.2. Waraysiga Ama La Waranka Dadweynaha

Haddii la rabo in mashruuca DCXA uu najaxo ama lagu guuleysto waa in marxaladdaan dadka la waraysanayo si fiican oo ah aqoon-isweydaarsi oo kale loo fuliyaa. Waxaa laga wada hadlayaa waa dhibaatooyinka dadkaas haysta iyo sidii xal loogu heli lahaa, arrintaasna cid iyaga uga war rooni ma jirto, fekradahooduna waxay mudan yihiin tixgelin iyo qadarin.

Wada hadalkan waxaa lagu falanqaynayaa doorka iyo wixii laga filaayo xubinkasta oo ka mid ah daneeyayaasha mashruuca, sida; bulsha-weynta, Daryeelaha, kaaliyaha caafimaadka xoolaha iyo ganacsatada.

La xaajoodka ama is-waraysiga dadweynaha waxaa haboon in dhawr jeer lagu celiyo oo beesha lagu noq-noqdo si dadka deegaankaas oo dhan loo wada gaadho fekradoodana loo ogaado. Xiligan waxaa bulshada lala gaadhayaa heshiis ku saabsan dhankasta oo hawsha la geli doono (social contract). Waxaa kale oo la isla meel dhigayaa habka xulashada Daryeelayaasha (criteria for selection).

### 2.2.3. Xulashada Daryeelaha

#### 2.2.3.1. Daryeele waa kuma

Daryeele waa qof ay soo dooratay bulshada beeshiisa, lana baray daryeelka caafimaadka iyo xanaanada xoolaha ee aasaasiga ah si uu bulshadaas ugu adeego aqoontaas la baray.

#### 2.2.3.2. Yaa Ku Haboon Daryeelenimo

Inkastoo beelkastaa xaq u leedahay inay la soo baxdo ciddii ay iyadu rabto, haddana hawsha Daryeele waxaa ku haboon dadkan:

- Qof ah xoolo-dhaqato/raacato
- Qof dhallinyar oo xooggan da'da 20-50 sanno
- Qof markasta ku sugan deegaanka beesha oo aan safaro dhaadheer (sida kuwa ganacsi) u kicin
- Qof aamin ah oo lagu wada kalsoonyahay
- Qof caafimaadkiisu taam yahay
- In uu diyaar u yahay hawsha loo xulay

- Diyaar qof u ah inuu baadiye u lugeeyo

### 2.2.3.3. Waajibaadka Daryeelaha

Arrimaha laga filaayo Daryeele waxaa ka mid ah:

- Inuu diyaar u yahay u adeegista bulshadiisa.
- Inuu si siman oo aan eex lahayn ugu adeego dhammaan xubnaha bulshadaas oo dhan.
- Inuu yahay daacad, aamin iyo runle.
- Inaan shakhsi leh awood xukun ama mid maal uusan maroorsan karin ama majara habaabin
  hawsha adeeg ee uu bulshada u hayo.
- Inuu qaddariyo oo uu ku dhaqmo sharciyada dalka ee caafimaadka iyo xannaanada xoolaha,
  kuwaas oo ay ka midyihiin; inuu si deg-deg ah ula socodsiiyo Waaxda Caafimaadka Xoolaha ama kaliyaha/takhtarka uu tooska ugu xiranyahay markii cudur halis ah meel ka dilaaco.

### 2.2.3.4. Xuquuqda Daryeelaha

Waxyaabaha uu Daryeele ka filaayo xubnaha bulshada uu u adeegayo waxaa ka mid ah:

- Tixgelin iyo ku xushmayn hawsha uu bulshada u hayo
- Ka qayb galka hawlaha la xiriira xoolaha ee beesha sida ururka isticmaalayaasha daawada xoolaha
- Mudnaan la siiyo haddii tababaro sare oo dhinaca xooluhu soo baxaan
- In markii ay suurta gal tahay beeshu ka tashato sidii abaalmarin dhaqaale loogu qorshayn lahaa
- In uu faa'iido dhaqaale ka helo daawada uu iibinayo
- In Daryeelayaashu samaystaan urur u gaar ah oo ay ku bahoobaan

### 2.2.4. Qaabka Tababarka Daryeelaha

#### 2.2.4.1. Wakhtiga Tababarka

Xoolo-dhaqatadu waa dad aad u hawlbadan waxaana la rabaa in tababarka lagu beego wakhtiga ay hawsha xooluhu ugu yartahay oo nefiska leeyihiin sida xiliga barwaaqada ama roobka. Beesha dadka loo tababarayo ayaa lala tashanayaa goorta ku habbon ee tababaarka Daryeelaha la qabanayo

#### 2.2.4.2. Goobta Tababarka

Tababarka waxaa ugu haboon in lagu qabto beesha dhexdeeda ama meel deegaankeeda ka mid ah. Xoolo-dhaqatadu had iyo goor waxay niyada ku hayaan xoolihii iyo dadkii ay ka soo tageen waxaa fiican in ay joogaan meel ay wixii war ahna ay
ka heli karaan fariinna ka diri karaan. Maadaama qaybta muhiimka ah ee tababarka oo ay tahay qacan ka qabad, waxaa lagama maarmaan ah in goobta tababarka ay ka dhawdahay meel xoolo lagu fuliyo hawsha gacan ka qabadka.

#### 2.2.4.3. Tirada Dadka la Tababarayo

Inta qof ee loo tababarayo beel waxay ku xirantahay baaxadda deegaanka iyo baahida jirta, waxaan lagala tashanayaa dadweyanaha beesha iyo hawl wadeennada caafimaadka xoolaha ee Daryeelayaashu ay ku xirnaan doonaan. Tirada Daryeelayaasha hal mar la siinayo (ama isku meel lagu tababarayo) tababar waxaa fiican in aanay badnayn ilaa toban ama shan iyo toban (10-15) waxaan ka badnayn. Tirada badan ee dadka la tababarayo waxay hoos u dhigi kartaa tayada tababarka.

#### 2.2.4.4. Tababaraha

Tababarka Daryeelaha waxaa bixinkara ama fulin kara hawl-wadeennada cafimaadka xoolaha siiba dhaktar ay taakulaynayaan ugu yaraan laba kaliye caafimaadka xooluhu. Shuruudaha laga rabo tababarayaasha waxaa ka mid ah:

- In ay soo qaateen “tababarka tababaraha”
- In ay aqoon u leeyihiin sida dadka waaweyn oo aan wax akhriyin wax loo baro
- In ay aqoon u leeyihiin qalabka waraysiga iyo macluumaad ururinta ee loo yaqaan PRAda
- In qaar ka mid ah tababarayaashu yihiin hawl-wadeennada caafimaadka xoolaha ee Daryeelayaashu ku xirnaan doonaan.
- In tababarayaashu ay yihiin xubno joogto ah oo Ururka Hawl-wadeennada Caafimaadka Xoolaha ee Deegaankaas
- Waxaa muhiim ah in tababaruhu fahmayo luqadda/lahjadda deegaankaas

### 2.2.4.5. Qaabka Tababarka Loo Fulinayo

Waxaa muhiim ah in la xusuusnaado in dadka la tababaraayo intooda badani yihiin dad waaweyn oo aan hore dugsi waxbarasho u gelin, sidaas darteedna qaabka wax loo barayaa yahay mid gaar ah.

Waxaa tijaabooyin lagu sameeyey sida dadka waaweyni wax u xusuusto markii la tababaro ka dib lagu ogaadey in; haddii casharka loo siiyo sidii khudbad ahaan (af ka sheegid) oo kale ay xusuustaan boqolkiiba toban keli ah (**10%**), haddii la isugu daro afka sheegis iyo tusidna ay xusuustaan boqolkiiba soddon (**30%**), haddiise la isugu daro afka oo looga sheego, tusid wixii la tuso iyo fursad la siiyo inay gacantooda ku qabtaan wixii loo sheegay ay xusuustaan ila boqolkiiba sideetan (**80%**) in ku dhaw.
Waxaa kale oo muhiim ah in tababaruhu niyadda ku hayo in xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed ay aqoon weyn u leeyihiin caafimaadka iyo daryeelka xoolaha ay dhaqdaan, waxa ay u baahanyihiina tahay in aqoontooda meelaha ay ku leedahay dal-daloolka laga buuxiyo wakhtigana aan lagu lumin wax aanay u baahnayn.
Heerka ay joogto aqoonta dadka la tababaridoono waxaa qiyaas lagaga qaadan karaa haddii waraysi kooban oo aqoon iyo xirfadba isugu jira lala yeesho qaar ka mid ah dadkaas.

Habka casharka uu ubaxaayo waa inuu ahaado mid ah aqoon-iswedaarsi ee uusan ahaan macallin wax sheegaya iyo arday dhegeysanaaya. Waa in tababaruhu dhiiri geliyaa sidii ay dadka uu wax barayo isu weydaarsan lahayeen waaya aragnimadooda waxna u kala kororsan lahayeen. Si taas loo helo waxaa lagula talinayaa tababaraha in u isku daro oo isticmaalo farsamooyinka tababarka ee soo socda:

- Su'aal iyo jawaab lagu ogaanayo aqoonta guud ee qofka la tababarayo
- La sheekaysi ama waraysi ujeedo leh
- Tusidda mataalka ama matalaha sida sawirada ama shayga laga hadlayo laftiisa oo la tuso
- Goo-goos ama sheeko-riwaayadeed kooban
- Gacan ka qabad sida; xoolo la baaro, kuwo la daaweeyo iyo fulin wixii ay soo barteen oo dhan ku saaban
- Ka sheekaysi arin ama dhacdo qof soo martay
- Dood iyo falanqayn

Tababaraha waxaa laga doonaya in uu la socdo sida ay dadka uu wax barayo duruusta u qaadanayaan , subax kastana waa inuu dersigii shalay oo kale wax ka waydiiyaa qaar ka mid ah Daryeelayaasha.

### 2.2.4.6. Muddada Tababarka

Muddada ama wakhtiga tababarka Daryeelaha waxaa lagu qiyaasay inay ugu yaraan ahaato isu geyntii boqol (100) saacadood oo loo fulinayo si isdabajoog ah wakhtina u dhexeeyo. Tababarada ku xiga kaas hore way ka muddo gaaban yihiin ujeeddadooduna waxay tahay in Daryeelaha aqoontiisa markasta kor loo sii qaado, wixii dhibaatooyin ah

ee uu la kulmayne lagala taliyo. Tababarka labaad oo ku xiga kan hore waxaa la qaban karaa inta u dhexeysa saddex ilaa lix bilood (3-6) gudahood. Tababarada aqoon kordhinta ah ee intaas ka dambeeya waxaa ka tashanaya qaybaha ay khusayso sida Hay'adda, Wasaaradda iyo beesha hawsha loo qabanayo.

### 2.2.4.7. Qaybaha Duruusta Tababarka Iyo Waqtiga Loo Qoondeeyey

Tababarka kowad ee Daryeeluhu wuxuu ka kooban yahay qaybaha soo socda:

**Qaybta koowaad**

- Furitaanka rasmiga ah ee tababarka
- Isbarashada; tababartayaasha iyo tababarayaashaba
- Muxuu yahay Daryeelka Caafimaadka Xoolaha ee Aasaasiga ah oo Heer Bulsho (DCXA); shuruudaha noqosho, xuguugda, waajibaadka iyo xidhiidhka daneeyayaasha kale
- Xeer hoosaadka lagu dhaqmayo mudada tababarku socdo
- Filitaanka iyo baqdinta tababartayaasha (waxa ay ka filayaan tababarka iyo waxa ay ka cabsanayaan)
- Maxaad u rabtaa in aad Daryeele noqoto

**Qaybta labaad**

- Muxuu yahay neef fayow ama caafimaad qaba
- Muxuu yahay neef jiran ama aan caafimaad qabin
- Qaybaha iyo xubnaha neefka iyo shaqooyinka ay qabtaan

**Qaybta saddexaad**

- Baarista guud ee xoolaha; wareysiga qofka neefka leh iyo baaris-caafimaadka guud ee neefka.
- Qabashada iyo xiritaanka neefka xoolaha ah
- Waxa sababa ama keenayaasha cudurada xoolaha; kuwa ay yihiin iyo sida loola dagaalamo.

**Qaybta afraad**: cudurada muhiimka ah ee xoolaha deegaankaas ku dhaca.

- Cudurada saameeya dhowr meesi oo xoolaha ah; is bar-bar dhigis ahmiyaadda cudurada ama qiimayn mid kasta ah, waxa keena, isugudbinta, astaamaha garashada, daawaynta iyo ka-hortagga
- Cudurada muhiimka ah ee u gaar ah geela
- Cudurada muhiimka ah ee u gaar ah lo'da
- Cudurada muhiimka ah ee u gaar ah adhiga
- Cudurada muhiimka ah ee gamaanka
- Cudurada digaaga
- Cudurada aan qeexneyn ee xoolaha iyo qaliinka fudud:
  Dibirada, sumowga, qaniinyada maska
  Goynta cidiyaha, geeska, dhufaanka iyo dhiig-joojinta
  Daaweynta nabarada, boogaha iyo maasha

**Qaybta shanaad**: Daawooyinka, Qalabka daaweynta, iyo talaalka xoolaha

- ❖ Maxay tahay daawo
- ❖ Noocyada daaweynta xoolaha; daawo dhaqameed iyo daawooyinka warshadaysan
- ❖ Samayska iyo xir-xirka daawooyinka
- ❖ Kutala galka iyo noocyada daawooyinka xoolaha
- ❖ Isticmaalka daawooyinka xoolaha; qiyaasta baahida neefka, hababka neefka loo siiyo daawo
- ❖ Cawaaqibka ama aayaha isticmaal xumada daawooyinka xoolaha
- ❖ Kaydinta daawooyinka iyo taxaddarka isticmaalka la xidhiidha
- ❖ Cabirka ama qiyaasta miisanka (culeyska) neefka
- ❖ Daawo-u-ekayaasha; sida loo garto, khatartooda iyo ka taxaddarka
- ❖ Talaalka xoolaha; samayska, kaydinta iyo isticmaalka.
- ❖ Qalabka daaweynta xoolaha; noocyada, isticmaalka iyo daryeelkooda

**Qaybta lixaad**: Gacan-ka-qabadka farsamooyinkii duruusta lagu soo qaatay.

- ❖ Wareysiga qofka neefka la jooga
- ❖ Baarista guud ee xoolaha
- ❖ Qabashada iyo hiritaanka xoolaha
- ❖ Qiyaasta miisaanka neefka xoolaha ah
- ❖ Isticmaalidda daawooyinka kala duwan
- ❖ Qalitaan-baariseedka baxthiga xoolaha iyo qaadista wixii shaybaar loo dirayo
- ❖ Qoritaanka warbixinta ama raadraac reebista

### 2.3. Xiriirka Daryeelaha iyo Takhtarka/Kaaliyaha Deegaanka

Daryeeluhu waa in uu ku xirnaado Takhtar ama kaaliye caafimaadka xoolaha kaas oo ku sugan ama u dhow deegaanka beesha loo tababarayo daryeelaha. Xidhiidhka u dhexeeya takhtarka/kaaliyaha iyo Daryeeluhu waa mid faa'iido u leh labada dhinacba arrimaha laga filayo midkastana waa sidan:

#### 2.3.1. Takhtarka/kaaliyaha waxaa laga rabaa:

- ❑ Inuu Daryeelaha xulitaankiisa iyo tababarkiisaba ka qayb qaato
- ❑ Inuu ka qayb qaato maalgelinta Daryeelaha sida kharashka daawada iyo qalabka uu shaqada ku bilaabayo
- ❑ Inuu Daryeelaha siiyo talo aqooneed oo joogta ah
- ❑ Inuu kormeero oo qiimeeyo hawsha Daryeeluhu hayo, kana soo ururiyo warbrxin joogto ah
- ❑ Inuu si joogto ah uga iibiyo (ka gado) daawooyinka iyo qalabka uu Daryeeluhu u soo baahdo

#### 2.3.2. Takhtarku/kaaliyuhu wuxuu Daryeelaha ka sugayaa:

- ❑ Inuu hawsha daryeelka caafimaadka xoolaha kordhiyo dhaqliga daawadana kor u qaado
- ❑ Inuu warbixin joogta ah oo ku saabsan caafimaadka xoolaha siiba cudurada faafa u soo gudbiyo takhtarka ama kaaliyaha

- Inuu xoolo-dhaqatada u gudbiyo wixii fariin ama wacyi gelin ah ee la faro
- Inuu ka qaybqaato hawlaha caafimaadka ee kale sida; talaalka iyo dhiig qaadista haddii looga soo baahdo

Tababarka Daryeeluhu wuxuu ka koobanyahay saddex qaybood oo midkastaaba manhaj (bug) u gaar ah leedahay.